# KAALMADA KİRADA (**WOHN**SCHIRM **MIETE**)

## 1. Goorma ayaa ay Kaalmada Kirada (WOHNSCHIRM MIETE) caawin kartaa?

- Waxa lagugu leeyahay **lacago kiro oo aanad bixin** oo
- Awood uma lihid inaad bixiso.
- Hoygaaga rasmiga ahi waxa uu ku yaallaa Austria.

Fadlan la xidhiidh xarunta la talinta ee kuugu dhaw waxana aad ka qabsataa **ballan**.

Xarunta ayaa dhammaan shuruudaha kuugu faahfaahin doonta la talin shakhsiyeed.

La talinta iyo gudbinta codsigu waa **bilaash**.

## 2. Sidee baa ay Kaalmada Kirada (WOHNSCHIRM MIETE) ii caawin kartaa?

Inta lagu gudo jiro la talinta, xaaladdaada dhaqaale ayaa laga hadli doonaa:

- Waa intee lacagta aad heli karto bil kasta?
- Waa intee kharashaadka gurigaagu?
- Waa intee lacagaha kirada ah ee lagugu leeyahay?

Taas marka laga yimaaddo, waxyaabaha soo socda ayaa laga hadli doonaa:

- Miyaa Kaalmada (**WOHN**SCHIRM) ay bixin kartaa lacagaha kirada ee lagugu leeyahay?
- Ama miyaa Kaalmada (**WOHN**SCHIRM) ay dhaqaale ahaan kaaga taageeri kartaa wixii guuritaan ah ee daruuri ah?

Xaaladaha qaarkood, la talinta waxa lagu heli karaa luqado kale. Fadlan la xidhiidh xarunta la talinta ee kuugu dhaw.

## 3. Maxay tahay in aan usoo qaato la talinta?

Fadlan soo qaado dukumintiyada muhiimka ah ee la xidhiidha xaaladda guriyeyntaada iyo dakhligaaga. Tusaale ahaan:

- Aqoonsiga (sida, liisanka darawalnimada, kaadhka aqoonsiga, baasaboorka)
- Caddeynta dakhliga ee dhammaan xubnaha qoyska (sida, waraaqaha mushaharka)
- Foomamka isdiiwaangelinta ee dhammaan xubnaha qoyska
- Heshiiska kirada

- Waraaqaha ama iimeylada ka socda mulkiilaha gurigaaga, maxkamadda, ama qareen, kuwaas oo muujinaya xaddiga lacagaha kirada ee lagugu leeyahay.

## 4. Waa maxay kharashaadka ay Kaalmada Kirada (WOHNSCHIRM MIETE) iga caawin karto?

**Kaalmada Kirada** (**WOHN**SCHIRM **MIETE**) waxa ay caawimo dhaqaale ka bixisaa lacagaha kirada ee aan la bixin.

Xaaladdan, waxyaabaha soo socda ayaa laga yaabaa sidoo kale in la bixiyo, tusaale ahaan:

- Kharashaadka maxkamadda
- Lacagaha xusuusinta
- Kharashaadka hawlgalka, haddii la soo dallaco iyada oo lasoo dhex marinayo mulkiilaha gurigaaga

Waxyaabaha soo socda **lama bixin karo**, tusaale ahaan:

- Deymaha aad gashay si aad u bixiso kiradaada (sida, deymaha bangiga, lacagta laga amaahday qaraabada)

## 5. Ayaa helaya lacagta taageerada ah?

Lacagta kirada ee lagugu leeyahay waxa si toos ah loo siin doonaa mulkiilaha gurigaaga. Taageerada guurista adiga ayaa si toos ah laguu siin doonaa.

## 6. Muddo intee le'eg ayaa uu qaadan doonaa codsigayga in laga hawlgalo?

Imika ahaan, dad badan ayaa soo gudbinaya codsiyada **Kaalmada**. Sidaas darteed, waxa laga yaabaa inay jiraan wakhtiyo sugitaan oo ka dheer kuwii hore. Si kasta oo ay tahay codsigaaga waa laga hawlgali doonaa.

Haddii aad hesho wargelin joojin, sheegasho saarid, ama taariikh saarid inta lagu gudo jiro muddada sugitaanka, fadlan la xidhiidh xarunta la talinta deegaankaaga. Codsigaaga markaas waxa looga hawlgeli doonaa si ka dhakhso badan sidii hore.

Adiga iyo xaruntaada la talinta waxa qoraal ahaan la idin ku wargelin doonaa ogolaanshaha ama diidmada codsigaaga.

## 7. Waxa aan helay wargelin joojin / sheegasho saarid / taariikh saarid. Maxay tahay in aan sameeyo hadda?

Miyaa mulkiilaha gurigaagu ku siiyey wargelin uu kusoo afjarayo heshiiska kirada? Miyaa maxkamaddu kuusoo gudbisay qoraal? Miyaa taariikh saaristaada ah laguu qoondeeyeyba? Codsigaaga waxa looga hawlgeli karaa si ka dhakhso badan sidii hore xaaladahaas oo kale.

La xidhiidh xarunta la talinta ee kuugu dhaw.

Haddii aad hore u gudbisay codsi, la xidhiidh isla xaruntii oo ku wargeli in xaaladdaadu ay is bedeshay.

## 8. Ma heli karaa taageero haddii aan sii kiraynayo?

Haa. Inta lagu gudo jiro la talinta, waxa la faahfaahin doonaa in lacagaha kirada ah ee lagugu leeyahay la bixin karo ama in taageero dhaqaale laguu siin karo guuritaan.

## 9. Ma heli karaa taageero haddii aan kiraystay guri?

Haa. Taageeradu kuma xidhna inaad kiraysato abaarman ama guri.

Inta lagu gudo jiro la talinta, waxa la faahfaahin doonaa in lacagaha kirada ee lagugu leeyahay la bixin karo ama in taageero dhaqaale laguu siin karo guuritaan.

## 10. Waxa jira lacago kiro oo la igaga leeyahay gurigayga labaad. Miyaa la bixin doonaa kuwan sidoo kale?

Maya, lacagaha kirada ah ee lagugu leeyahay waxa keliya lagaa bixin doonaa gurigaaga rasmiga ah ee koowaad.

WOHN SCHIRM HOUSING FIRST

# KAALMADA (**WOHN**SCHIRM **HOUSING FIRST**) (KAALMADA GURİYEYNTA)

## 1. Goorma ayaa ay Kaalmada (WOHNSCHIRM HOUSING FIRST) i ca-awin kartaa?

- Waxa aad tahayhoy-la'aan ama guri sugan la'aan, oo
- Awood uma lihid inaad wanaajiso xaalkaaga adiga laftaadu ama aad ku wanaajiso khayraadkaaga gaarka ah.
- Waxa aad leedahay dakhli hooseeya.
- Waxa aad ku nooshahay Austria.
- Waxa aad gaadhay da'dii sharciga.

Fadlan la xidhiidh xarunta la talinta ee kuugu dhaw waxana aad ka qabsataa **ballan**. Xarunta ayaa dhammaan shuruudaha kuugu faahfaahin doonta la talin shakhsiyeed.

La talinta iyo gudbinta codsigu waa **bilaash**.

## 2. Sidee baa ay Kaalmada (WOHNSCHIRM HOUSING FIRST) ii caawin kartaa?

**La talinta hore, xaaladdaada hadda** ayaa laga hadli doonaa. Tusaale ahaan:

- Halkee ayaa aad hadda ku nooshahay?
- Yoolkaagu ma yahay inaad yeelato abaarman kuu gaar ah?
- Intee lacag ah baa aad u heli kartaa tan bil kasta?
- Waa maxay nooca taageerada ee aad u baahan tahay?

Xarunta la talinta ayaa kuu faahfaahin dooonta inaad buuxisay dhammaan shuruudaha iyo in kale isla markaana si wadajir ah kuula gudbin doonta codsi Kaalmada (**WOHN**-SCHIRM **HOUSING FIRST**).

Maxaa xigaya haddii codsiga la ansixiyo?

**Taageero iyo meelayn guriyeed**: Shaqaalahaaga bulsheed ayaa kaa caawin doona helitaanka guri habboon oo qiime jaban. **Kaalmada** (**WOHN**SCHIRM **HOUSING FIRST**) ayaa sidoo kale bixin karta debaajida ama lacag-isku-biirinta dhaqaale. Waxa aad heli doontaa heshiiskaaga kirada ee gaarka ah waxana aad bixin doontaa kharashka kirada adiga laftaadu.

Kahor iyo kadib marka aad usoo guurto guriga, shaqaalahaaga bulsheed ayaa kaa taa-geeri doona kuguna wehelin doona mawduucyo badan oo kala duwan. Tusaale ahaan:

- Haddii aad qabto mashaakil caafimaad.
- Haddii aad u baahan tahay inaad codsato dheefaha bulshada balse aanad garaneyn sidii aad u codsan lahayd.
- Ama haddii aanad garaneyn sidii aad ugu rakibi lahayd koronto iyo gaas abaarmanka cusub.

Fadlan la xidhiidh xarunta la talinta ee kuugu dhaw.

## 3. Maxay tahay in aan usoo qaato la talinta?

Haddii aad heli karto, fadlan usoo qaado dukumintiyada muhiimka ah ee la xidhiidha xaaladdaada guriyeynta iyo dakhligaaga. Tusaale ahaan:

- Aqoonsiga (sida, baasaboorka, liisanka darawalnimada, kaadhka aqoonsiga)
- Caddeynta xaaladda guriyeynta (sida, xaqiijinta hoyga rasmiga ah ama "diiwaangelinta hoy-la'aanta", waraaq ka socota guriyeynta la taageero, waraaq ka socota qaabilaadda xaaladda degdegga ah)
- Caddeynta dakhliga dhammaan xubnaha qoyska (sida, waraaqaha mushaharka, caddeynta kaalmada dhaqaale ee qoyska, waraaqda dheefta shaqo-la'aanta ee AMS)

Xarunta la talinta ayaa ku siin doonta dhammaan macluumaadka dheeraadka ah inta lagu gudo jiro la talinta hore.

## 4. Ma ku codsan karaa onlayn ahaan?

Maya. Fadlan ballan ka qabso xarun la talin.

Xarunta la talinta ayaa kaala hadli doonta in **Kaalmada** (**WOHN**SCHIRM **HOUSING FIRST**) ay tahay barnaamijka kugu habboon iyo in kale. Kadib waxa aydun si wada jir ah u gudbin doontaan codsi.

## 5. Goorma ayaa la ii tixgelinayaa in aan ahay hoy-la'aan ama guri sugan la'aan?

**Hoy-la'aan** waxa ay ka dhigan tahay in aanad meel aad gasho oo sugan lahayn. Tusaale ahaan:

- Waxa aad seexataa waddada.
- Waxa aad dhex seexataa teendho.
- Ama waxa aad ku sugan tahay qaabilaad xaaladda degdegga ah.

**Guri sugan la'aan** waxa ay ka dhigan tahay inaad haysato meel aad gasho balse aanad lahayn meel kuu gaar ah. Tusaale ahaan:

- Waxa aad la deggan tahay macaarif ama saaxiib waxana aad ku tiirsan tahay iyaga si aad uga baaqato seexashada waddada.
- Waxa aad ku nooshahay xarun loogu talagalay hoy-la'aanta.
- Waxa aad ku nooshahay hoy haween.
- Ama waxa aad ku nooshahay meel lagu qaabilo shakhsiyaadka barakacayaasha ah.

## 6. Waxa laga yaabaa in aan waayo hoygayga maadaama oo la igu leeyahay lacago kiro ah. Miyaa ay Kaalmada (WOHNSCHIRM HOUSING FIRST) tahay barnaamijka igu habboon?

Fadlan la xidhiidh xarun la talin **Kaalmada Kirada** (**WOHN**SCHIRM **MIETE**) ah.

**Kaalmada Kirada (WOHN**SCHIRM **MIETE**) waxa ay bixisaa lacagaha kirada ee la leeyahay ama waxa ay taageero dhaqaale ka bixisaa guuritaanka daruuriga ah.

## 7. Waxa aan ahay hoy-la'aan waxana aan si degdeg ah ugu baahanahay goob aan seexdo. Maxay tahay in aan sameeyo?

Halkan waxa aad ka heli kartaa liis adeegyada kaalmada hoy-la'aanta ah ee Austria:

WOHN SCHIRM ENERGIE

# KAALMADA TAMARTA (WOHNSCHIRM ENERGIE)

## 1. Goorma ayaa ay Kaalmada Tamarta (WOHNSCHIRM ENERGIE) i caawin kartaa?

- Waxa jira lacago tamarta ah oo aanad bixin (sida, korontada, gaasta, kulaylinta degmada) balse iskama bixin kartid adigu.
- Bixiyaha tamartaadu waxa uu kugu wargeliyey ka jaritaanka tamarta gurigaaga, ama tamarta waaba la jarayba.
- Waxa aad leedahay dakhli hooseeya. Waxa aad ka heli kartaa xaddidaadaha dakhliga halkan.
- Hoygaaga rasmiga ah ee koowaad waxa uu ku yaallaa Austria.

Fadlan ogsoonow: **Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay kaalmo bixin kartaa halmar. Haddii aad hore caawimo uga heshay **Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**), ma gudbin kartid codsi labaad.

Fadlan la xidhiidh xarunta la talinta ee kuugu dhaw waxana aad ka qabsataa **ballan**. Xarunta ayaa dhammaan shuruudaha kuugu faahfaahin doonta la talin shakhsiyeed.

La talinta iyo gudbinta codsigu waa **bilaash**.

## 2. Sidee baa ay Kaalmada Tamarta (WOHNSCHIRM ENERGIE) ii caawin kartaa?

Inta lagu gudo jiro la talinta, **xaaladdaada dhaqaale** ayaa laga hadli doonaa:

- KIntee lacag ah ayaa aad heli kartaa bil kasta?
- Waa intee kharashaadka tamartaada?
- Intee kharash deyn tamar ah ayaa lagugu leeyahay?

Taas marka laga yimaaddo, waxyaabaha soo socda ayaa laga wada hadli doonaa:

- Miyaa bixiyaha tamartaadu **kugu wargeliyey jarid**? **Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay bixin kartaa lacagaha tamarta ee lagugu leeyahay. Xarunta la talintu waxa ay kaa caawin doontaa inaad ka hortagto jarid.

- Miyaa **tamartaada la jarayba**? **Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay bixin kartaa lacagaha tamarta ee lagugu leeyahay. Xarunta la talintu waxa ay kaa caawin doontaa inaad dib usoo ceshato tamarta.

Xaaladaha qaarkood, la talinta waxa lagu heli karaa luqado kale.Fadlan la xidhiidh xarun la talin oo kuu dhaw.

## 3. Maxay tahay in aan usoo qaato la talinta?

Fadlan soo qaado dukumintiyada muhiimka ah ee la xidhiidha xaaladda guriyeyntaada iyo dakhligaaga. Tusaale ahaan:

- Aqoonsiga (sida, baasaboorka, liisanka darawalnimada, kaadhka aqoonsiga)
- Foomamka isdiiwaangelinta ee dhammaan xubnaha qoyska
- Caddeynta dakhliga ee dhammaan xubnaha qoyska (sida, waraaqaha mushaharka)
- Biilasha tamarta (sida, korontada, gaasta, kulaylinta degmada)
- Waraaq ama iimeyl: xusuusin ay la socoto taariikh jaritaan ama caddeyn jaritaan

## 4. Waa maxay dakhliga ugu badan ee aan heli karaa?

Waxa aad ka hubin kartaa xaddidaadaha dakhliga halkan.

Waxyaabaha soo socda ayaa lagu tiriyaa inay yihiin **dakhli**, tusaale ahaan:

- Dakhliga laga helo shaqada is-u-shaqaysiga iyo cidkale-u-shaqaynta(marka laga reebo gunnooyinka fasaxyada iyo Kirismaska)
- Dheefaha AMS sidadheefta shaqo-la'aanta iyo kaalmada xaaladda degdegga ah
- Kaalmada bulsheed, dakhliga ugu hooseeya
- Lacagta hawlgabka
- Kaalmada dhaqaale ee qoyska, dheefta daryeelka ilmaha, kharashbixinada nafaqada
- Kaalmada kirada, dheefta guriyeynta
- Lacagta fasaxa xanuunka

Waxyaabaha soo **socdalagu ma tiriyo inay yihiin dakhli**, tusaale ahaan:

- Kaalmada daryeelka
- Taageerada daryeelka 24-saac
- Kaalmada la kordhiyey ee qoyska

## 5. Waa maxay kharashaadka ay Kaalmada Tamarta (WOHNSCHIRM ENERGIE) iga caawin karto?

**Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay bixisaa kaalmo dhaqaale haddii tamartaada lagaa jarayo ama lagaa jarayba.

Lacagaha xusuusinta ayaa sidoo kale la bixin karaa xaaladdan.

Deymaha aad gashay si aad u bixiso biilashaada tamarta (sida, deymaha bangiga, deymaha laga qaato qaraabada) lama bixin karo.

## 6. Ayaa helaya lacagta taageerada?

Lacagta taageerada waxa si toos ah loogu xawilaa bixiyaha tamartaada.

Haddii aanay tani suuragal ahayn, **Kaalmad Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay si toos ah kuugu soo diri doonaan lacagta haddii ay jiraan xaalado gaar ah.

## 7. Muddo intee le'eg ayaa ay ku qaadan doontaa codsigayga in laga hawlgalo?

Imika ahaan, dad badan ayaa gudbinaya codsiyada **Kaalmada**. Sidaas darteed, waxa laga yaabaa inay jiraan wakhtiyo sugitaan oo ka dheer kuwii hore. Codsigaaga waa laga hawlgali doonaa si kasta oo ay tahay.

## 8. Waxa la igu leeyahay deymo tamarta ah balse la iima soo dirin wargelin jaritaan. Miyaa ay Kaalmada Tamarta (WOHNSCHIRM ENERGIE) i caawin kartaa?

Maya, **Kaalmad Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay keliya ku caawin kartaa xaaladaha soo socda:

- Haddii hore laguugu qoondeeyey taariikh jaritaan.
- Ama haddii tamartaada (korontada, gaasta, kulaylinta degmada) la jarayba.

## 9. Miyaan u baahanahay heshiis tamar? Muxuu yahay?

Haa, waxa aad u baahan tahay heshiis tamar si ay **Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) kuu caawiso. **Kaalmada Tamarta** (**WOHN**SCHIRM **ENERGIE**) waxa ay keliya bixin karaan deymaha laga galo heshiisyada tamarta ee ansaxa ah.

Waxa aad leedahay heshiis tamar haddii aad ka hesho tamar (sida, koronto, gaas, kulaylinta degmada) shirkad bixisa tamarta).